



## Waxa soo socda: Dhacdadii Aragtida ayaa loo qorsheeyay OMSI; gadista buugaagta la isticmaalay iyo dhirta

Nidaamka Aragtida Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa safar geli doona si ay booska martida uga helaan mid ka mid ah meelaha soo jiidashada leh ee astaanta u ah Portland, OMSI.

Maalinta Sabtida ah, Maajo 11, kooxda muhiimka u ah Aragtida ayaa soo bandhigi doonta bandhig casri ah, macluumaad la isdhaafsanayo oo ku saabsan shaqadooda ilaa iyo hadda ay qaybteen. PPS waxay qorshaha Aragtiyeed ee 2018 PPS isaga oo ah hab lagu aqoonsanayo isla markaana lagu qeexayo waxay ay PPS noqon karto, waxa ay tahay in ay noqoto, iyo sida ardayda, shaqaalaha, qoyska iyo bulshadu ay u heli karaan “North Star” la qeexay oo la isla wadaagay oo loogu talagalay degmada.

Bilihii [Janaayo](#), [Febraayo iyo Maarso](#), degmadu waxay qabatay kulamo badan oo ay la yeelatay wax daneeyayaal ka kala socda meelo badan isla markaana leh qaaab-dhismeedka kala duwan. Iyada oo la adeegsanayo tababar, kooxda muhiimka ah iyo Isbahaysiga Dhanka Tilmaanta ‘Guiding Coalition’ ayaa bilaabay in ay sameeyan aragti

- **Sawirka Qalin jabinta:** Maxay yihiin aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha iyo fikirka ay ardaydu u baahan doonaan si ay ugu guuleystaan noloshooda iyo xirfadahooda shaqo?
- **Sawirka Dadka Waaweyn:** Maxay yihiin aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha iyo fikirka ay dadka waaweyni u baahan doonaan si ay ardayda uga taageeraan in ay helaan Sawirka Qalin jabinta?
- **Isbeddelka Nidaamka:** Sidee baa degmada oo dhani ugu baahan tahay in ay wax beddesho si ay u taageeraan guusha ardayda?

Maajo 11 dhacdada ka dhacaysa OMSI ayaa laga heli doonaa fursad lagu bixiyo jawaab celin ku saabsan aragtida degmada iyada oo PPS ay ku jirto dhammeystirka qaybtii u dambeysay aragtida oo Juun dhacaysa.

Ka soo qayb galayaashu ma aha in ay soo gelaan madxafka si ay soo aadaan dhacdada Aragtida. Soo gelitaanka madxafka qiime dhimis ayaa lagu sameyn doonaa Maajo 11 taasi loogu talagalay xubnaha ka tirsan PPS oo dadka waaweyn iyo carruurta bixinayaan \$12. (Bandhiga “The Science behind Pixar” wuxuu socon doonaa maalintaasi.) PPS waxay bixin doontaa fursad soo gelitaan oo lacag la’aan ah oo ay helayaan ardayda iyo qoysaska baahiyaha ugu sareeya qaba dugsiyadeena.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga helayaa [website-ka Aragtida](#).

**Gadista buugaagta waxaa ku jirta maalinta macallimiinta:** Munaasabad lagu tilaamo in ay tahay Gadista buugaagta ugu badan ee Oregon “Oregon’s largest used book sale” ayaa socon doonto marka Saaxiibada Maktabadda Degaanka Multnomah ay qabtaan gadisteeda buugaagta sanadlaha ah ee waqtiga gu’ga ee Abriil 26-29 oo ka dhacaysa Lloyd Center DoubleTree Hotel Exhibit Hall (1000 NE Multnomah St.).

Dhacdada waxaa lagu soo bandhigi doonaa in ka badan 40,000 shay, oo leh jaldi adag ‘hardcover’ iyo jaldi caadi ah ‘paperback’ oo tayo leh oo qiimahoodu yahay \$2, buugaagta jaldiga caadiga ah leh ‘paperback’ ee loogu talagalay ganacsiga ballaaran iyo buugaagta carruurta oo qiimahoodu kala yahay 50 cents iyo \$1, CD oo ah \$1, iyo DVDs oo ah \$2.

Maalinta Qiime Dhimista Macallimiinta waxaa la qorsheeyay Axada, Abriil 28, laga bilaabo 11 subaxnimo iyo 5 galabnimo, iyada oo waxyaabaha qaarkood qiimahooda hoos loogu dhigay boqolkiisa 50 kuwaasi oo loogu talagalay dadka haysta aqoonsiga dugsiga oo sax ah. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga helayaa [website-ka dhacdada](#).

**Goobta gadista dhirta:** Barnaamijka Waqtiga Kala-guurka Bulshada wuxuu gadista dhirtiisa ee sanadlaha ah ku qaban doonaa xafiiska degmada PPS ee ku yaala (501 N. Dixon St.) Khamiista, Abriil 25 laga bilaabo 10:30 subaxnimo ilaa 1 galabnimo. Ardaydu waxay gadi doonaan dhir kala duwan, oo ay ku jiraan dambiisha Maalinta Hooyada ‘Mother’s Day’, dhirta sanadlaha ah iyo kuwa muddada badan jira, geedaha yaanyada iyo khudaar hada uun soo baxaysa, iyo dhirta guriga. Dhirta waxaa dhismaha kor ka xiran ‘greenhouse’ ee CTP ku beeray ardayda.

Barnaamijku wuxuu sidoo kale toddobaadka oo dhan dhir ku gadayaa dhismaha dhirta ee ku yaala 6801 SE 60<sup>th</sup> Ave., laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 3 galabnimo, ilaa Jimcaha. Ganacsiga ay ardaydu gacanta ku hayso wuxuu wax gadis kale Maajo 6-11 ku qaban doonaa dhismaha, isaga oo xafiiska degmada la booqanayo Khamiista, Maajo 9 laga bilaabo 10:30 subaxnimo ilaa 1 galabnimo.

Macluumaad dheeraad ee ku saabsan Barnaamijka Waqtiga Kala-guurka Bulshada ayaa laga helayaa [website-ka barnaamijka](#).